Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Baaritaanka Xasaasiyada Daawada
## Medicine Allergy Challenge (Somali)

Baaritaanka xasaasiyada daawada waa baaritaan loo isticmaalo in lagu ogaado in cunugu xasaasiyad ku qabo nooc daawada kamid ah ama daawooyinka, badanaa waxaa loo isticmaalaa antibiyootiko. Waa daawo hab kuurooyin ah loo qaato. Tani waxaa loola jeedaa in cunuga la siiyo kuurooyin yar (cadad) daawada su'aasha laga qabo ah. Markaas kadib si dhaw ayaa loola socdaa xaaladooda si looga eego waxyeellooyinka daawada ama astaamaha falcelinta xasaasiyada, oo sidoo kale loo yaqaan xasaasiyada cuntada iyo daawada ee anaphylaxis (anna-fa-LAX-is). Waxyeellooyinka daawada la mid MA AHA falcelinada xasaasiyada.

Marka cunugu uu qabo mid kamid ah waxyeellooyinka daawooyinku keenaan, adeeg bixiyaasha caafimaadka badanaa waxay ku calaamadeeyaan inay xasaasiyad ku qabaan. Haddii xasaasiyada daawo lagu qoray diiwaanka caafimaadka ee cunugaaga, adeeg bixiyaha caafimaadka ayaa iska ilaalin kara inuu siiyo daawada u noqon karta daawada ugu wanaagsan ama daawada ugu kharashka yar. Tani waa sababta ay muhiim u tahay in la ogaado in cunugu waxyeelo ka qaadaayo daawada ama inuu daawada falcelin xasaasiyadeed ka qaadaayo.

Dhaqtarka xasaasiyada waxa uu ku waydiin doonaa su'aalo faahfaahsan oo ku saabsan waxa ku dhacay cunugaaga markii uu qaatay daawada. Haddii ay u maleeyaan in cunugaagu qaadan karo daawada mar labaad, waxay markaas qaban doonaan ballan looga baaraayo falcelinta xasaasiyada ayadoo looga baaraayo xarunta xasaasiyada bukaan socodka.

Baaritaanka xasaasiyada daawada wax dhib ah ma keento haddii la sameeyo. Xataa haddii cunugaagu horey falcelin uga sameeyay daawada, adiga iyo cunugaaga waa inaanan ka welwelin. Cunugaaga ayaa la joogi doontaa wakhtiga oo dhan. Kooxda xasaasiyada ayaa si dhaw ula socon doonta muddada hawshu socoto.


© 2021, Nationwide Children's Hospital
Sii socota…

## Baaritaanka ka hor

- Haddii cunugaagu yahay cunug wayn, u sharax baaritaanka:
  - Cunug kasta waxa uu dareemaa wax kamid ah astaamaha guud ahaan inta lagu jiro baaritaanka.
  - Baaritaanku sameyntiisu wax dhib ah ma keeneyso.
  - Markasta waad la joogi doontaa.
  - Haddii uu dareemo falcelinta xasaasiyada, isla markiiba waxa uu heli doonaa daawo.
- **Haddii cunugaagu xanuunsan yahay, fadlan rugta caafimaadka ka wac (614) 722-5803 si aad ballan dib ugu qabsato.** Si loo ilaaliyo qof kasta caafimaadkiisa, cunugaaga waa inuusan qabin qandho, qabow, duufka sanka ka yimaada, qufac ama dareemin xanuun.
- Baaritaanka waa in waqti kale laga dhigo haddii, maalinta baaritaanka, uu yeesho boogo ama finanka maqaarka.

## Sida loo diyaariyo baaritaanka

Cunugaaga:

- Waa inuusan qaadan nooc kamid ah daawada qandhada iyo xasaasiyada (antihistamine) sida diphenhydramine (Benadryl®) ama cetirizine (Zyrtec®), muddo ugu yaraan 4 maalmood ka horeysa xiliga baaritaanka.
- Waa inuusan **joojin** qaadashada wax kamid ah daawooyin ka loo soo qoray, oo ay kamid ah yihiin qalabka daawada neefta lagu qaato, daawada sanka la iskaga buufiyo ama kareemada maqaarka.
- Waxa uu cuni karaa ama cabi karaa wax kasta uu jecel yahay kahor baaritaanka.
- Waxa uu soo qaadan karaa waxyaabo si uu u haysto, sida buugaagta, ciyaaraha elektarooniga ah iyo boonbilayaasha dharka laga sameeyo.

## Sida baaritaanka loo sameeyo

- Cunugaaga waxaa lala socon doonaa ama kormeer lagu sameen doonaa muddo dhan 90 daqiiqo. Lama gelin doono wax mashiin ah nooc kastaba ha ahaadee. Guud ahaan, ballantu waxay qaadanaysaa 2 saacadood.
- Inta badan baaritaanada daawada waxaa la sameeyaa ayadoo cunugaagu la siinaayo kuuro yar oo daawo ah iyo cabitaan uu ku laqo. Sidoo kale waxaan awoodnaa inaan baaritaan ku sameyno daawooyinka keliya lagu qaadan karo cirbada (cirbadaha ama duritaanka).

- Kadib marka uu cunugaagu qaato daawada, waxaan fiirin doonaa xaaladiisa 20 illaa 30 daqiiqadood. Haddii uusan muujin waxyeellooyinka daawada, sida finan, ama astaamaha falcelinta xasaasiyada, waxaa la siin doonaa kuuro badan.
- Kadib marka la joogo 40 illaa 60 daqiiqo oo kale, waxaan fiirin doonaa cunugaaga mar labaad. Baaritaanku hadda wuu dhamaaday. Haddii cunugaagu uusan muujin wax astaamaha falcelinta xasaasiyada ah, markaas waxaan ogaan doonaa inuusan daawada ku qabin xasaasiyad.

## Halisaha iyo dhibaatooyinka suurtagalka ah

Uma badana in cunugaagu daawada ka qaado xasaasiyad inta baaritaanka la sameynaayo. Falcelinta xasaasiyada dhabta badanaa marnaba ma dhacdo. Haddii aan dooneyso inaan cunugaagu daaweyno sabab kastaba awgeed, waan joojin doonaa baaritaanka.

- Si loo daaweeyo astaamaha waxyeellooyinka daawada ee yaryarka ah, sida cuncunka, finanka, qufaca ama mataga, dhaqtarku waxa uu cunugaaga siin doonaa daawada qandhada iyo xasaasiyada (antihistamine) si ugu roonaado.
- Inkastoo ay tahay arrin dhif iyo naadir ah, hadana haddii cunugaagu muujiyo astaamaha aadka u daran ee falcelinta xasaasiyad ah, sida neefta oo ku dhegta, matag joogto ah ama cadaadiska dhiiga oo hoos u dhaca, waxa uu heli doonaa daawada xaaladaha degdeg ah ee epinephrine. Daawada epinephrine si dhaqso ah ayay u shaqeysaa si meesha looga saaro xasaasiyada cuntada iyo daawada laga qaado ee (anaphylaxis).

## Baaritaanka kadib

- Marka la dhameeyo baaritaanka aadna aado guriga, waa inaad siiwado inaad la socoto xaalada cunugaaga dhowr saacadood oo dheeraad ah si aad u hubiso inuusan qabin waxyeellooyinka daawadu keento. Haddii uu dareemo, nala soo socodsii.
- Haddii cunugaagu uusan dareemin astaamaha falcelinta xasaasiyada, waxaan diiwaankiisa caafimaadka ka tirtiri doonaa macluumaadka aan saxneyn ee sheegaya xasaasiyada.
- Si mustaqalka, uu cunugaagu si caadi ah ugu qaado daawada waqti kasta oo uu u baahan yahay. Fadlan xaqiiji inaad macluumaadkaan la wadaagto dhaqtarkaaga adeeg bixiyaha ah iyo dadka kale ee u baahan inay ogaadaan.

## Goorta ay tahay in la waco rugta xasaasiyada ama 911

- Wac rugta xasaasiyada haddii cunugaagu aad ku aragto waxyeellooyinka daawadu keento, sida cuncun, finan, qufac ama matag kadib markay aadaan guriga maalinta baaritaanka.
- **Wac 911** haddii aad aragto astaamaha falcelinta xasaasiyada sida:
  - dhibaato dhanka neefta ah ama hadalka
  - dhuun cariiri
  - carabka oo barara
  - matag joogto ah
  - dareemida jahwareerka